



Waa Maxay Hawlaha Gurmaddu?

Hawlaha Gurmaddu waa adeeg ay isticmaasho dawlada dhexe ee Mareykanku si loo hubiyo in la heli karo cudud militari markii dalku galo xaalad degdeg ah ama loo baahdo in ciidamada la soo arruuriyo arrin khatarteeda leh oo jirta awgeed.

Yaa laga rabaa in ay iska diiwaan geliyaan xafiiska hawlaha gurmadda?

Raga da'doodu u dhexeyso 18 ilaa 25 ayaa laga rabaa in ay iska diiwaan geliyaan xafiiskan, qaxootiguna waa ka mid.

Ciqaabaha!

Ganaaxyo halis ah ayaa u yal ninkii aan iska diiwaan gelin hawsha qaranka; ninkii aan is diiwaan gelin waxaa lagu xukumi karaa ilaa \$25,000 oo lacag ah ama shan sano oo xarig ah. Tani mar mar dhif ah ayey dhacdaa, waxaase jira ganaaxyo kale. Tusaale, waxaa ninka loo diidi karaa in uu xaq u yeesho helida shaqooyinka dawlada, ama waxaa loo diidi karaa helida deymanka wax lagu barto iyo kuwa xirfadaha lagu kasbado. Dadka soo galootiga ah, marka lagu daro qaxootiga waxaa loo diidi karaa in ay Muwaadiniin Mareykan ah Noqdaan.

Habka Diiwaangelinta:

Ma jiri karto sabab aad seddexdaas ciqaabood loogu bareeri karaa, haddiiba ay is diiwaan gelintu tahay mid sahlan. Waa in aad buuxisaa foom yar (SSS Form 1M) waana in aad u dirtaa cinwaanka dusha kaga yaal ee Xafiiska Shaqada Qaranka. 90 maalmood kabacdi markii la is diiwaan geliyo, waxa uu qofku helaa warqad uga timid xafiiskaas oo u xaqiijinaysa in la diiwaan geliyey, taas oo ay ku qoran tahay dhamaan akhbaarta is diiwaangeliyaha iyo lambaradiisuba. Waxaa loo sheegaa diiwaan-gashanaha in uu wixii ka bedelma cinwaankiisa la socodsiiyo Xafiiska Shaqada Qaranka. Tan waxaa lagu gaaraa in la buuxiyo SSS FORM 2. Haddii aadan wax jawaab ah helin 90 beri kabacdi markii aad foomka dirto, waa muhiim in aad warqad u qorto cinwaanka hoose, ama aad wacdo lambarkan 703-605-4000 si aad u habsato in is-diiwan gelintaadii la helay iyo in kale. Cinwaanku waa:

**Selective Service System
Registration Information Office
P. O. Box 94638
Palantine, IL 60094-4638**

Haddii aad tahay nin ku jira inta u dhexeysa 18 ilaa 25, oo aadan is-diiwaan gelin waxaad u baahan tahay in aad dhakhso isku diiwaan geliso. La xiriir qofka kaa caawiya IRC-da wuxuu ku siin doonaa Foomka Diiwaangelinta wuuna kaa caawin doonaa in aad buuxiso. Is-diiwaan gelintu waa fududahay waana Sharci.